# Adeegyada Warshada ee gudaha: Shaqaalaha daryeelka ee gudaha Shuruudaha COVID-19

Dhukumintigaani wuxuu khuseeyaa adeegyada warshada ee gudaha waana mid u gaar ah shaqaalaha daryeelka gudaha. Ujeedada Dhokumantigan waa, shaqaalaha adeega ee gudaha waa shaqaale kasta oo hal iyo wax ka badan oo shaqaalaysiiye ah oo siiya adeeg gudaha ah shaqsi ama qoys ama guri gaar ah isagoo ugu adeegaya shaqaale daryeele guri ah. Shaqaalaha adeegga gudaha waxaa ka mid ah shaqaale saacadle ah iyo kuwo mushahar qaata, qandaraasleyaal madaxbannaan oo siiya shaqaale shaqsiyeed, kuwo shaqeeya waqti-buuxa iyo kuwo shaqeeya qayb, iyo shaqaale ku meel gaadh ah. Shaqaalaysiiyaasha waxaa ku jira hay'adaha shaqaaleysiinta, shaqsiyaad, reeraha, iyo loo shaqeeyayaasha (tusaale ahaan, ganacsiyada bixiya adeegyo toos ah, oo ay kujiraan wakaaladaha shaqada iyo goobaha shaqo ee online ka ah) oo si toos ah ama si aan toos ahaynba u siiya shaqaale gudaha ah si ay ugu bixiyaan adeegyada sida shaqaalaha daryeelka guriga. Meesha ay ka badan yihiin hal shaqaalaysiiye, shuruudaha ayaa lagu dabaqayaa shaqaalaysiiye kasta / xidhiidhka ka dhexeeya shaqada iyo shaqaalaha.

Shaqaalaha kale ee gudaha ayaa daboolay tilmaamo gaar ah maxaa yeelay shaqadooda looma qeexin inay lama huraan u yihiin Baaqa Guddoomiyaha Gobolka 20-05. Shaqaalaha daryeelka guryuhu waa kuwa, gudaha ama ku saabsan guri gaar ah, oo u fidiya adeegyo daryeel shakhsi ahaaneed dadka naafada ah, ama kuwa buka, waayeelka, ama haddii kale u nugul, kuwaas oo ka caawiya iyaga inay u qabtaan “shaqooyinka nolol maalmeedka”, sida cunidda, qubeyska, iyo lebiska. Intaa waxa dheer caawinta waxqabadka nolol maalmeedka, shaqaalaha daryeelka guriga ayaa waliba laga yaabaa inay ka caawiyaan “waxqabadyo aasaasi ah oo nolol maalmeedka” ah, oo u oggolaanaya shaqsiyaadka inay si madaxbanaan ugu dhex noolaadaan bulshada. Shaqaalaha daryeelka guryuhu way ku jiraan, laakiin aan ku xadidnayn, kuwa ay cadaystay State Department of Health ee hoos yimaada RCW 18.88B.

Shaqada ay qabteen Shaqaalaha Daryeelka Guriga waxaa loo arkaa inay muhiim u yihiin Baaqa Gudoomiyaha Gobolka ee 20-05 sidaas darteedna adeegyo fara badan ayaa weli u hadhay meesha uu ku hadhay cudurka COVID-19. Shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada waa in loo raacaa sida ay u diiwaangeliyeem shaqaalaysiiayasha iyo shaqaalaha shakhsiyaadka daryeelka guriga.

Ilaa xad in bixin kastaaba waa *gudaha* aan ku haboonayn shaqaalaysiiayaha halka shaqaale, waxay u baahantahay in aanu raacin sida shaqaalaysiiyaha oo kale

Waxaa la ogsoon yahay in shaqaalaha warshadaha adeegga guduhu ay si aan caadi ahayn ula kulmayaan xaddidno ku saabsan awoodda ay u leeyihiin inay diidaan inay qabtaan shaqada, helitaanka fasaxa bukaanka ee mushaharka qaata, iyo inay helaan kabka shaqo la'aanta. Dhamaan xaaladaha shaqada, loo shaqeeyayaashu waa inay ogaadaan xadidaadaha shaqaalahooda ku yeelan karo helitaanka ilaalinta shaqaalaha.

## Shuruudaha Badbaadada iyo Caafimaadka

Dhamaan loo shaqeeyayaasha adeega gudaha waxaa saaran waajibaad guud oo ah inay ilaashadaan goob shaqo oo badbaado leh oo caafimaad leh iyadoo la raacayo sharciga iyo qawaaniinta gobolka iyo federaalka. Intaa waxa u dheer, waa in ay u hoggaansamaan shaqada gaarka ah ee soo socota ee COVID-19 kuna saabsan goobta shaqada ee lagu qeexay Baaqa “Safe Start” ee Gudoomiyaha Gobolka 20-25.4, iyo iyada oo la raacayo Shuruudaha Guud ee L&I iyo Fikradaha Ka Hortagga Goobaha Shaqada.

Gobolka Washington Department of Health iyo Department of Social and Health Services waxay horimariyeen dhukumentiyo hagitaan badbaado oo loogu talagalay shaqaalaha:

- Gobolka Washington Department of Health Talooyinka daryeel bixiyaasha guryaha dhexdooda
- Gobolka Washington Department of Social and Health Services Shakhsiyaadka bixiya (IPs) Tilmaanta ah Bixinta Daryeel badbaado inta lagu guda jiro dillaaca COVID-19

Shaqaalaysiiyaasha ama cida la shaqaysa loo shaqeeyaasha ee fulisa howlaha maamulka, sida Wakaalada Daryeelka Guriga iyo Gobolka Washington, waa inuu raacaa shuruudaha iyo tilmaamaha COVID-19 si loo ilaaliyo shaqaalaha, ay ku jiraan:

- Shaqaalaha aqoonta u leh luuqadu way fahmayaan sida ugu fiican coronavirus iyo sida looga hortago isku gudbinta iyo siyaasadaha shaqaalaysiiyaasha ee COVID-19.
- Joogtaynta kala saarida lixda lugood u dhexeeya dhamaan shaqaalaha iyo macaamiisha iyo dhamaan isdhexgalada macquulka ah ee sida way u muuqankara. Marka kala fogaanshaha duleed aysan macquul aheyn shaqo gaar ah, talaabooyin kale oo ka hortag ah ayaa loo isticmaali karaa, sida adeegsiga gidaaro, yareynta shaqaalaha ama macaamiisha meelaha cidhiidhiga ah ama xidhan, kala jabinta iyo kala goynta shaqada oo bilaabata.
- U siiso shaqaalaha kharash la'aan una baahan xidhashada qalab ilaalin shaqsiyeed (PPE) sida galoofyada, muraayadaha indhaha, gaashaanka wejiga iyo waji-xidhka wejiga sida ku habboon waxqabadka la qabanayo. Ku qeex Coronavirus shuruudaha Daboolka wajiga maaskarada Faah faahin dheeraad ah. Shaqaalaha daryeelka guriga ee bixiya daryeelka COVID macaamiisha qaba ama kuwa ay ka muuqdaan calaamadaha ayaa loo qaadanayaa inay ku sugan yihiin “Khatar Aad u Weyn” waana in la siiyaa PPE ku habboon. Shaqaalaha daryeelka guriga ee daryeela macaamiisha ay ka muuqdaan calaamadaha waa in loo qaddariyo inay ku jiraan qaybta “Khatarta Dhex-dhexaadka” waana in la siiyaa maaskarada qalliinka, iyo sidoo kale suurtagalnimada PPE dheeraad ah sida ku habboon iyada oo ku xidhan xaaladda. Intaas waxaa sii dheer, marada lagu daboolo wajiga waa in uu siiyaa shaqaalaysiiyuhu oo waana in uu xidhaa shaqaale kastaa aan shaqaynayn kaligii ama shaqo u qabanaya bulsho hadii kale dayacnaantooda waxay muujinaysaa heer ilaalo sare oo hoos tagta Department of labor & Industries badqabka hagayaasha iyo xeerarka caafimaad Marada waji xidhashada waxa lagu qeexay Tilmaamaha Department of Health Waxyaabaha ka reeban shuruudahan daboolista wejiga waxaa ka mid ah marka aad keligaa ka shaqeyso xafiis, gaadhi, ama goob shaqo; haddii shakhsigu yahay dhagoole ama maqalkiisu adag yahay, oo uu la xidhiidho qof ku tiirsan tilmaamaha luqadda sida calaamadaha wajiga iyo muuqaalka iyo dhaqdhaqaaqa afka oo qayb ka ah isgaadhsiinta; haddii shaqsigu qabo xaalad caafimaad ama naafo ka dhigaysa xidhashada wejiga mid aan ku habooneyn; ama marka shaqadu aysan lahayn is dhexgalka qof ahaaneed.

Loo shaqeeyuhu waa inuu raacaa shuruudaha iyo tilmaamaha COVID-19 si loo ilaaliyo shaqaalaha oo ay ku jiraan waxyaabaha hoos ku taxan. Shaqaalaha daryeelka guryuhu waxay shaqaalaysiiyeen macaamiil shaqsiyaad ah waxayna ku bixiyeen DSHS sida Bixiyeyaasha Shakhsiyadeed lagu doortay, mudaysan oo kormeeraya macmiilka-loo-shaqeeyaha. Xaaladahan, DSHS waxay soo saartaa tilmaamo ku saabsan sida looga hortago caabuqa iyo fiditaanka COVID:

- Hubi marwalba in aad dhaqdo gacmahaaga si kugu filan adiga oo la isticmaalaya alaabta kugu filan. U isticmaal galoofisyada la tuuro meesha aaminka ah iyo quseeya si looga hortago gudbinta faayraska aaladda ama waxyaabaha kale ee la wadaago.
- Hubso nadiifin joogto ah iyo fayodhawrka meelaha sida joogtada ah loo taabtay.
- Ka hubi shaqaalaha iyo macaamiisha astaamaha iyo calaamadaha xanuunka COVID-19 bilawga qaybta shaqada. Shaqaalaha daryeelka guryuhu waa in ay joogaan guryaha ama ay si deg deg ah

ay guriga u tagaan hadii ay dareemaan ama uu ka muuqdo xanun. Ka jooji shaqaalaysiiyaha aan deganayn in ay soo galaan meelaha xafiisyada ah halkaas oo shaqaale ay suuro gal tahay ama laga helay xanuunka COVID-19 uu ka shaqaynayo, meel uu taabtay, IWM. ilaa iyo inta meeshaa ama oogadaa la nadiifinayo. Raac tilmaamaha nadiifinta ay dajisay xarumaha xakamaynta xanuunka si xeel dheerna u nadiifi oo jeermiskana ka dil.

- Ogeysii shaqaalaha daryeelka guriga isla markaaba ka dib marka shaqaalaysiiyuhu uu raadiyo in ay tahay natiiyajadii kasoo baxday shaqadoodii oo ay u dayacnaayeen shakhsiyaad laga xaqiijiyay in ay qabaan xanuunka COVID-19.

Shaqaaluhu wuu diidi karaa inuu qabto shaqo aan amaan ahayn, oo ay kujiraan khataraha ay abuurtay COVID-19. Shaqaalaha daryeelka guriga ee aamminsan in xaaladdoodu ammaan aanay ahayn waa inay la xidhiidhaan shaqaalaha bulshada ama kormeeraha wakaalada. Waa sharci darro in shaqo-bixiye kasta oo ku hoos jira RCW 49.17 inuu tallaabo xun ka qaado shaqaale ku hawlan hawlo badbaadin oo sharciga waafaqsan haddii diidmadooda shaqadu ka soo baxdo shuruudaha qaarkood. Macluumaadka laga helayo daabacaadahan: midab kalasooca amni iyo caafimaad ee xayaysiiska goobta shaqo iyo midab kalasooca amniga isbaanishka iyo caafimaad ee xayaysiiska goobta shaqo.

Shaqaalaha doorta inay naftooda ka saaraan goobta shaqada maxaa yeelay ma aaminsana inay aamin tahay in laga shaqeeyo iyadoo ay ugu wacan tahay khatarta soo-gaadhista COVID-19 ayaa laga yaabaa inay galaan fasax gaar ah ama kabka shaqo la'aanta. Loo-shaqeeyayaashu waa inay siiyaan shakhsiyaad halista weyn ku jira ee ay dabooshay Baaqa 20-46 oo ay xulasho u leeyihiin helitaanka fasaxa shaqo-bixiye ee la heli karo ama kabka shaqa la'aanta haddii qaab shaqo kale oo aan macquul aheyn la arki karin. Shaqaalaha kale waxay yeelan karaan fasax ballaadhan qoys iyo caafimaad oo lagu daray Sharciga Jawaabta xeerka Qoysaska Koowaad ee Feejignaanta, Kabka shaqo la aanta, ama waqti kale oo lacag lagu qaato iyadoo kudhantahay duruufaha. Macluumaad kale oo dheraad ah ayaa la heli karaa meelaha Sheekada dilaaca xanuunka Coronavirus COVID-19 iyo Fasaxa caafimaad ee hoos yimaada Washington Family Care Act iyo Families First Coronavirus Response Act.

**<u>Shaqaalaha Daryeelka Guryaha:</u>**

Intaa waxa dheer, shaqaaluhu waa in ay:

1. Guriga joogaan markay xanuusanayaan. Ogoysii shaqaalaysiiayha marka aad ka shakido ama la xaqiijiyay in uu jiro COVID
2. U sheeg kormeeraha haddii uu jiro xubin qoyska ka jiran oo guriga jooga COVID-19. Haddii shaqaaluhu leeyahay xubin ka mid ah qoyska oo buko COVID-19, shaqaalahaas waa inuu raacaa shuruudaha go'doominta / karantiilista sida ay dejisay Waaxda Caafimaadka ee Gobolka.
3. Kahor inta aan lasoo warin shaqada, horay u wac oo weydii haddii qofka aad daryeel siineyso inuu la kulmayo astaamo ay ka mid yihiin qandho, qufac ama neefsashada oo ku adkaata isla markaana ku cusub. Hadday sidaas tahay, tixgeli haddii adeegyada dib loo dhigi karo ama la raacayo taxaddarrada ku taxan dukumentiga Tilmaamah Daryeelka Guriga ee COVID-19.
4. Joogto ugu yaraan lix-lugood kala goynta adiga iyo dadka kale ee guriga mar alla markay suuragal tahay. Marka fogeyn duleed aysan macquul aheyn shaqo gaar ah, talaabooyin kale oo ka hortag ah ayaa loo istcimaalaa sida isticmaalka maaskarada wejiga iyo PPE.
5. Dhaq gacmaha si isdaba joog ah, bilowga iyo dhamaadka xili shaqeedkaaga iyo kahor iyo kadib diyaarinta cuntada ama taabashada dareeraha jidhka. Ku dhaq gacmaha saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbiriqsi ama isticmaal jeermisdile alkahol ah leh oo ay ku jiraan ugu yaraan 60% aalkohol ah.
6. Ka fogow taabashada meelaha oogada ah ama walxaha guriga dhexdiisa ah intii suurogal ah. Dhaq meelaha dushooda la taabato inta la shaqaynayo.

**Shaqsi macmiil shaqaalaysiiye ah kaas oo shaqaalaysiiyay shaqaale daryeel oo guri si uu ugu usiiyo adeeg guryahooda:**

7. U sheeg shaqaalaha daryeelka guriga marka macmiilku ku jiro karantiil guriga, buko, ama ay kasoo muuqdaan astaamaha la xidhiidha COVID-19.
8. Marka shaqaalaha daryeelka gurigu buko ama u muuqdo qof buko, u baahan iyaga inaanay shaqayn ilaa ay bukoodaan.
9. Maydh gacmaha si isdaba joog ah marka shaqaalaha daryeelka guriga joogo.
10. Ka ilaali ugu yaraan lix fogaan masaafad ah shaqaalaha daryeelaha guriga marka ay suurogal tahay oo yaree wakhtiga lagu bixinayo u dhawaanshaha shaqaalaha daryeelka guriga.

**Tilmaamaha goobta shaqada**

11. Shaqsi kasta oo joogo oo awood u leh xirashada maaskaro inta lagu gudajiro waqtiga la bixinayo adeegyada daryeelka guriga waa inuu xirtaa ugu yaraan maro wejiga daboosh si looga fogaado khatarta faafinta bulshada. Shakhsiyaadka noocan oo kale ah ayaa sidoo kale si xoogan loogu dhiirigelinayaa inay raacaan dhammaan shuruudaha PPE. Markay suurtagal tahay, dadka joogo guriga inta uu shaqaale guri ka shaqaynayo waa inay u guuraan meelaha ka fog shaqaalaha guriga iyo qolalka yaryar oo ay galaan qolal waaweyn si ay u taageeraan kala fogaanshaha bulsheed si weyn marka loo eego shaqaalaha guriga. Shakhsiyaadka goobta shaqada laga yaabee ineysan awoodin inay adeecaan, loomana baahna inay u hogaansamaan, iyagoo xidhanaya maro wejiga lagu daboolayo iyo / ama PPE sababa la xiriira garashada, koritaanka ama naafanimada shaqada.
12. Si dhaw ula soco. Hadaadan kari karin inaad ka wada hadashid faahfaahinta muhiimka ah ku dhawaad, ka dhig mid dhexgalkaaga qof ahaaneed mid gaabin ah oo joogow masaafo dhan lix-lugo inta lagu jiro wadahadal kasta. Shakhsiyaadka hela daryeelka guriga ma awoodi doonaan inay u hoggaansamaan, lagamana doonayo inay u hoggaansamaan, iyada oo loo baahan yahay masaafada iyo shuruudaha waqtiga marka ay ugu wacan tahay garashada, koritaanka ama itaal darrida naafanimada darteed.
13. Kiniin nigis iyo meelaha qashinka waa in laga helaa goobta shaqada ama guriga.
14. Loo-shaqeeyayaashu waxay shaqaalaha ku wargalin doonaan xuquuqdooda ah inay iyagu ka baxaan goobta shaqada haddii aysan aamminsanayn inay nabdoon tahay, iyo sidoo kale awoodda ay u leeyihiin helitaanka fasax ama kabka shaqo la'aanta xaaladahaas.
15. Haddii shaqaale guri laga filayo inuu dhammaystiro hawlo dheeri ah, sida nadiifin isdaba-joog ah iyo jeermisdilid, tan waa in lagu muujiyaa heshiis qoraal ah shaqaalahana waa in magdhow laga siiyaa waqtiga ay shaqeeyeen.
16. Dhammaan tababarka shaqaalaha goobta waa inuu dhacaa waqtiga lacagta lagu siiyay.
17. Mar alla markii ay suuragal tahay shaqaaluhu waxay u dhaqaaqi doonaan si gooni gooni ah goobaha shaqada, halkii gaadhiba hal qof.
18. Haddii shaqaaluhu ku kulmaan meel dhexe oo ay u safraan goobta shaqada gawaadhida ay shirkaddu leedahay, u dir hal gaadhi hal koox oo hana bad badalin. Ku safridda baabuurta ay shirkaddu leedahay ama baabuur kale oo badan oo leh qaad waxaa lagu xaddidi doonaa 50% awooda gaadhiga iyo kala fogaanshaha bulshada iyo shuruudaha PPE sida lagu sharxay Lifaaqa Wejiga Daboolista iyo Shuruudaha Maskarada.

Halkii ay ku haboontahay, arrimaha la xidhiidha badbaadada shaqaalaha iyo caafimaadka waxaa laga qaadayaa tallaabo fulin ah oo hoos timaada L&I's Division of Occupational Safety and Health (DOSH).

- Shaqaaleysiiyayaashu waxay codan karaan COVID-19 talada ka hortaga iyo caawimada L&I's Division of Occupational Safety and Health (DOSH).

- Cabashooyinka badqabka iyo caafimaadka shaqaalaha ee goobta shaqada waxa loo gudbin karaa Xarunta Badqabka L&I DOSH: (1-800-423-7233) ama iimayl u dir adag235@lni.wa.gov.
- Su'aalaha guud ee ku sahabsan u hogaansanaanta ku dhaqanka heshiiska waxa loo gudbin karaa Xarunta Ka Jawaabista Ganacsiga ee gobolka https://coronavirus.wa.gov/how-you-can-help/covid-19-business-and-worker-inquiries.
- Jabinta Amarada kale ee 20-25 waxa laga gudbin karaa https://bit.ly/covid-compliance.